

Naafaynta saxaaxa dumarka

Falka naafaynta saxaaxa dumarka/gabdhaha wuxuu dalka Iswiidan ka yahay fal sharci-jebin ah (1982:316). Xeerka waxaa ku qoran:

1 § Waa mamnuuc in falaadxumo/qalitaan lagu sameeyo xubnaha taranka dibadeed oo dumarka, iyadoo ujeedadu tahay in saxaaxooda la curyaamiyo ama qaabkooda wax laga bedelo. Waa mamnuuc xitaa haddii qofku u raali ka yahay in la gudo. (Sharciga 1998:407).

2 § Qofkii jebiya qodobka koowaad waxaa lagu ciqaabi doona xabsi ilaa afar sano ah. Haddiise sharci-jebinta ay halis geliso noolasha qofka falka lagu sameeyay amase cudur halis ah ku dhaco waxaa sharci-jebinta lagu qiyaasi doona mid aad u culus. Qofkii denbi culus lagu oogo waxaa caadi ahaan lagu ciqaabaa labo ilaa tobban sano oo xabsi ah. Qofkii jebiya mid ka mid ah qoddobada hoos ku qoran waxaa lagu ciqaabi doona sida hadba ku xusan cutubka 23-aad xeerka ciqaabta. Waxaa qoddobada ka mid ah: qofkii denbigelida ka warqabay oo aan booliska wargelin, iskudayo, diyaargareeyo amase denbi-gelid isku diyaariyo. (Sharciga 1998:407).

3 § Qofkii dambiga galay sida hadba ku xusan xeerkan, waxaa lagu eedeyn karaa maxkamadaha dalka Iswiidan hortooda, xitaa haddii aan la adeegsan karin cutubka 2-aad qoddobka 2-aad ama 3-aad ku xusan diiwanka dambiileyaasha.